LIGHT READING
customer newsletter

Seb/Okt 2007

## Wax ka Qabashada Haatan ee Cimilada Seattle

*Waxaannu AWOODNAA in aan wada shaqeyno*

Waxaa soo diyaariyey Duqa Magaalada Greg Nickels

***Seattle gudaheeda, waxaa ka jirta aqoonsi guud in cimilada kululaaneysa ee caalamka aysan ahayn dhibaato oo ay ka walwalaan jiilka mustaqbalka oo kaliya. Waxay khatar ku tahay dhulkeenna waana in maanta wax laga qabtaa. Badankeennu, su'aasha ina hortaal ayaa ah "Maxaan AWOODAA in aan ka qabto ka hortagga cimilada dhulka ee kululaaneysa?" Jawaabtu waa mid sii fududaaneysa.***

Bisha Sitembar waa bisha ay billaabmayso **Wax ka Qabashada Haatan ee Cimilada Seattle,** oo ah barnaamij lagu siinaayo qof kasta oo Seattle ku nool qalabka ay u baahan yihiin si ay isbeddel ugu sameeyaan guriga, shaqada, iyo dariiqaba. Waxaa uu meel isugu keenayaa adiga iyo dadka magaalada iyo dariiqyada si aad wax uga qabataan badbaadinta cimilada.

Ka qayb qaadashadu waa ay fudud tahay. Boggayaga cusub ee internetka waxaa uu furmayaa Sebtembar 21. Waxaad booqataa **www.SeattleCAN.com** oo wax ka baro tillaabooyinka fudud ee aad qaadan kartid. Waxaad fursadaha ka ogaan kartaa xaafaddaada. Adiguna waxaad la xiran kartaa dadka adiga kaala shaqeynaya sidii Seattle looga dhigi lahaa magaalada dalka oo idil ugu jawiga fiican.

### Kuwani ayaa ah seddex qaab ee lagu caawini karo.

### 1. *Dhuuqso* & Wax Kaydso! Waxaad isticmaashaa galuubka fluorescent-ka (CF) ah

Waxaad xulataa galuubyada CF sababtoo ah waxay isticmaalaan koronto ka yar boqolkiiba 75 si ay u sameeyaan iftiin la mid ah galuubka kale ee loo yaqaan *incandescent*. Seattle City Light (Shirkadda Korontada ee Seattle) waxay kafaalad qaadaysaa in ay hoos u dhigto qiimaha galuubyada Energy Star® CF ee laga helo dukaamada badankood sida Bartell Drugs, The Home Depot iyo Costco Wholesale. Waxaad booqataa **www.seattle.gov/light/conserve** ama waxaad wacdaa **(206) 684-3800** si aad u heshid liiska ugu dambeeyey ee dukaamanka ka qayb qaadanaya iyo macluumaadka ku saabsan noocyada galuubyada, awoodooda iyo qiimahoodaba.

### 2. Qaybinta bilaashka ah ee afka tubada qubeyska ee ay biyaha ka soo baxaan oo ay ku eg tahay Oktoobar 31.

Waa uu dhammaanayaa waqtiga loogu qaybinayo qoysaska, oo ay kafaalad qaadeen Seattle City Light iyo shirkadaha kale ee adeegga korontada/gaaska/biyaha. Noocan afka tubooyinka qubeyska waxaa ka dhasha kaydis boqolkiiba 20 ka badan oo ah biyaha iyo tamarta marka la barbardhigo qalabka kale ee jira badankooda. Haddii uu kaa lumay ama aadan helin warqaddii boostada laguugu soo diray, waxaad fadlan wacdaa **(206) 838-5392** si aad u dalbatid, ama waxaad booqataa **www.savingwater.org**. Macaamiisha u qalma gargaarka korontada/gaaska waxay u qalmaan in bilaash loogu rakibo.

### 3. Khasnadda Badbaadinta Cimilada Xaafadda

Marka aannu wada shaqeyno, waxaan soo saari karnaa xal aan hore keli ahaan u soo saari karin. Khasnadda Badbaadinta Cimilada Xaafadda waxay idinka taageeraysaa adiga iyo deriskaagaba si aad dhab uga dhigtaan mashruuca badbaadinta cimilada. Si aad wax dheeraad uga ogaatid, waxaad soo wacdaa **(206) 684-4520** ama waxaad booqataa: **www.seattle.gov/neighborhoods/nmf/climate.htm**.

LIGHT READING
customer newsletter



## Si ay u sii shidnaadaan nalalka dariiqa

***Shaqaala City Light waxay aad ugu hawlan yihiin sidii ay u sii shidnaan lahaayeen in ka badan 100,000 oo nalalka dariiqyada ah.*** Waxaannu ku qanacsan nahay sidii aad inooga caawiseen soo sheegidda dhibaatooyinka nalalka dariiqa. Bogga internetka **www.seattle.gov/light/streetlight** ama adigoo soo waca **(206) 684-7056** ayaad ku soo sheegi kartaa nalalka dariiqa ee haleysan.

**Si waxtar leh ayaan wax uga qaban karnaa marka aad ina siisid macluumaad tifaftiran:**

- Waxaad soo sheegtaa lambarka baallaha/tiirka – lambarrada huruudka ah ee ka kooban hal illaa iyo shan ee ku yaal lix illaa toban cagood baallaha/tiirka korkiisa. Waxaad inoo soo sheegtaa haddii ay ku taal "A" lambarka kaddib.
- Waxaad ina siisaa cinwaanka daarta u dhow, oo ay ku jirto magaca dariiqa iyo jihada. Tusaale ahaan, 1234 *5th Avenue S.*
- Waxaad qeexdaa ciladda jirta. Tusaale ahaan, nalka waa uu shidmayaa waana uu damayaa ama si toosan uma shidnaanayo.

Guluubyada la beddelaayo waxaa la dhammeystiraa afar maalmaha shaqada gudahooda xilliga dayrta iyo 17 xilliga jiilaalka oo dhibaatooyin badan ee xiriira la soo sheego. Dayactirka qaarkiisa ayaa ah mid dhib badan oo qaata muddo dheer si loo dhammeystiro. Fadlan sabar, xilliga ay dabeylaha jiraan. Hawlaha inoo yaal ayaa badan kara inta ay shaqaalaha dariiqyada ay si ku meel gaar ah ugu hawlan yihiin dayactirka qaab hawleedka korontada.

## Goorma ayaa biilkaaga la qiyaasaa?

City Light waxay ku qiyaasayaan isticmaalka korontada marka aan akhrin karin mitirka ama marka nidaamka biilashayaga ay soo saaraan in mitirka la akhriyey in ka baxsan yahay xisaabta caadiga ah, iyadoo lagu saleynayo isticmaalkii hore.

Waxaannu qiyaasnaa isticmaalka in uu ku saleysan yahay isticmaalkii hore si looga hortago biil badan ama yar ee laguu soo diro. Hase ahaatee, caadi ahaan biilka la qiyaasayo aad ayuu uga badan yahay ama aad ayuu uga yar yahay. Marka macaamiisha loo diro biil aad u yar, dib ayaa biil kale loogu soo dirayaa waxaana la siinayaa waqti dheeraad ah ee ay ku bixiyaan haraaga inta la qiyaasay iyo inta ay tahay xisaabta saxda ah. Marka macaamiisha loo diro biil badan, waxaannu u xisaab-gelin doonnaa xisaabta dheeraadka ah ee loo diray. Haddii aad su'aalo badan ka qabtid biilkaaga, waxaad fadlan wacdaa **(206) 684-3000** si aad ula hadashid wakiilka adeegga macaamilka. Macaamiisha aan ku hadlin luqadda Ingiriiska, turjubaanno ayeey helayaan Isniinta illaa Jimcaha, 7:30 subaxnimo illaa 6-da fiidnimo. Haddii mitirkaaga uu ku yaal meel gadaal ka xigta albaab xiran islamarkaana aan la qorsheynin sidii lagu akhrin lahaa, waxaad wacdaa **(206) 386-1731.**

Waxaad helaysaa foomkani oo noocyo kala duwan ah haddii aad codsatid. Waxaad helaysaa macluumaaadka wargeyska oo lagu turjumay Spanish, Vietnamese, Chinese, Somali, Tagalog iyo Korean. Waxaad Adeegga Macaamilka ka wacdaa (206) **684-3000**.
Seattle City Light, 700 Fifth Avenue, Suite 3200. PO Box 34023, Seattle WA 98124-4023. Web: **www.seattle.gov/light**
Tifaftiraha: Marilyn Mar E-mail: marilyn.mar@seattle.gov